








# Heestii Sakima

-  Ursula Nafula
-  Peris Wachuka
-  Abdi Muse
-  3
-  Soomaali



Sakima wuxuu la noolaa waalidkiisa iyo walaashiisa afar jirta ah. Waxay ku noolaayeen dhulka ninka hodanka ah. Mundul kooda cawska ah waxuu ku yaalay meesha ugu dambaysa geedaha safan.



Marku Sakima ahaa saddex jir, ayuu xanuunsaday oo aragiisii waayay. Sakima wuxuu ahaa wiil yar oo heybad leh.



Sakima waxuu sameeyay waxyaabo badan oo wiilasha da'doodu tahay lix sano jir aysan sameynin. Tusaale ahaan, wuxuu la fadhiisan karay dadka waa yeelka ah ee tuulada waxuuna kala xaajoon jiray arrimaha muhiimka ah.



Waalidiinta Sakima waxay ka shaqeyn jireen guriga ninka hodanka ah. Waxay ka tagi jireen guriga aroortii, waxayna soo laaban jireen fiidkii. Sakima waxaa looga tagi jiray walaashiisa yar.



Sakima wuxuu jeclaa in uu ku heeso heesaha. Maalin maalmaha ka mid ah, waxay hooyadiis weydiisay, “Halkee baad kaso barataa heesahan, Sakima?”



Sakima wuxuu ku jawaabay, “Way iska imaadaan, hooyo. Waxaan ka dhex maqlaa madaxayga dabadeedna waan ku heesaa.”




Sakima wuxuu jeclaa in uu u heeso walaashiisa yar, gaar ahaan, haddii ay dareento gaajo. Walaashiis waa ay dhageysan jirtay isaga oo heesayo heestiisa ugu macaan. Waxaa soo jiidan codka cod macaan leh.





“Ma heesi kartaa mar kale, Sakima,” walaashiis ayaa ka baryi jirtay. Sakima waa uu ka aqbalaa oo ku celceliyaa heesta marar badan.



Hal fiid markii ay waalidkiis guriga ku soo laabteen, ayay aad u aamusnaayeen. Sakima wuxuu ogaa in ay wax qaldan jiraan.



“Maxaa qaldan hooyo, aabe? “Sakima ayaa waydiiyay. Sakima wuxuu ogaaday in wiilka ninkii hodanka ahaa uu maqan yahay, ninku wuxuu ahaa mid aad u murugooday oo cidloobay.




“Waan u heesi karaa isaga. Waxaa laga yaabaa in uu markale farxo,” Sakima ayaa waalkiisa u sheegay. Laakiin waalidiintiisii waa ay eryeen. “Waa nin aad taajir u ah, waxaad tahay wiil indho la. Ma waxaad u maleyneysaa in ay heestaada caawin doonto?”



Si kastaba ha ahaatee, Sakima ma niyad jabin. Walaashiisii yarayd ayaa ku taageertay isaga. Waxay tiri, "Sakima heestisa way idajisaa markaan gaajoonayo. Wayna dajin doontaa ninka taajirka ah."




Maalintii xigtay, Sakima wuxuu walaashiisii yarayd weydiistay in ay u wado ninkii taajirka ahaa gurigiisa.



Waxa uu hoos istaagay daaqad weyn wuxuuna bilaabay in uu ku heeso heestiisi uu ugu jeclaa. Si tartiib ah, madaxa ninki hodanka ah ayaa bilaabay in uu kasoo muuqdo daaqadi weynayd.





Shaqaalihii way joojiyeen wixii ay sameynayeen. Waxay dhagaysteen heesta Sakima ee quruxda badan. Laakiin hal nin ayaa yiri, "Qofna ma awoodin in uu dajiyo booska. Wiilkan indhoolaha aha ma waxuu u maleynayaa inuu dajin doono?"





Sakima wuu dhameysatay heestiisi uu heesayay waxa uu na u jeestay in uu tago. Laakiin ninkii taajirka ahaa ayaa banaanka si degdeg ah ugos baxay oo wuxuu ku yidhi, Fadlan markale hees.



Waqtigaa xaadirka ahaa, laba nin ayaa yimid iyaga oo qof ku wado naxash. Waxay soo heleen ninkii taajirka ahaa wiilkiisa oo la garaacay loo gana tagay wadada dhinaceeda.






Ninkii taajirka ahaa waxuu aad ugu farxay in uu mar kale arko wiilkiisa. Waxuu abaalmariyey Sakima qalbiga uu dajiyay awgeed. Wuxuu isbitaalka u qaaday wiilkiisa iyo Sakima si Sakima na uu dib ugu helo aragiisa.



# Global Storybooks

[globalstorybooks.net](http://globalstorybooks.net)

## Heestii Sakima

-  Ursula Nafula
-  Peris Wachuka
-  Abdi Muse

